Bristol City Council
EDUCATION WELFARE SERVICE

XAADIRITAANKA DUGSIGA: MAXAY WAALIDIINTA & DARYEELAYAASHU U BAAHAN YIHIIN INAY OGAADAAN

XAADIRITAANKA DUGSIGA MAALIN WALBA WAA TIRSAN TAHAY KU CAAWI ILMAHAAGA INAY HEER FIICAN GAARAN

ALBANIAN
Nëse anglishtja nuk është gjuha juaj amtare dhe keni nevojë për një përkthim, ne mund t'ua sigurojmë atë.

BENGALI
ইংরেজী আপনার মাতৃভাষা না হলে এবং আপনার কোন অনুবাদের প্রয়োজন হলে আমরা তা প্রদান করতে সক্ষম।

CHINESE
如果英文不是您的第一語言，而您需要翻譯的話，我們可以爲您安排。

GUJARATI
જો તમારી પહેલી ભાષા અંગ્રેજી ન હોય અને તમને ભાષાંતરની જરૂર હોય તો અમે તમને તે આપી શકીએ છીએ.

HINDI
यदि अँग्रेज़ी आप की पहली भाषा नहीं है और आप को अनुवाद की आवश्यकता है तो यह हम आपको प्रदान कर सकते हैं

KURDISH
Heke îngilîzî zimanê we yê yekem nîne û pêwîstîya we bi wergêr heye, em dikarin yekî ji we re bibînin

POLISH
Jeżeli język angielski nie jest Twoim językiem ojczystym i wymagasz tłumaczenia, możemy to zapewnić.

PORTUGUESE
Se o Inglês não é a sua língua materna e precisa de uma tradução, nós podemos obtê-la.

PUNJABI
ਜੇਕਰ ਇੰਗਲਿਸ਼ ਤੁਹਾਡੀ ਪਹਿਲੀ ਭਾਸ਼ਾ ਨਹੀਂ ਅਤੇ ਤੁਹਾਨੂੰ ਦੁਭਾਸ਼ੀਏ ਦੀ ਜ਼ਰੂਰਤ ਹੈ ਤਾਂ ਤੁਹਾਡੇ ਲਈ ਅਸੀਂ ਇਸਦਾ ਪ੍ਰਬੰਧ ਕਰ ਸਕਦੇ ਹਾਂ।

SOMALI
Haddii Ingiriisku aanu ahayn afkaaga kowaad oo aad u baahan tahay turjumaad, annagaa kuu samayn karra.

URDU
اگر انگریزی آپ کی پہلی زبان نہیں ہے اور آپ کو ترجمہ کی ضرورت ہے تو ہم آپ کے لئے فراہم کر سکتے ہیں۔

VIETNAMESE
Nếu quí vị không thạo Anh văn và cần bản dịch, chúng tôi sẽ giúp quí vị một bản.

ADEEGGA CAAWINTA WAXBARASHADA

Kooxda Waqooyi
Teleefoon: 0117 3533686
Faakis: 0117 3533688

Kooxda Koonfureed
Teleefoon: 0117 9031660
Faakis: 0117 9031684

"HADDII AAN HELO OGAYSIIN GANAAX OO AANAN BIXIN MAXAA DHACAYA?"

Waxaad haysataa ilaa 42 maalmood markaad hesho warqadda inaad bixiso Ogaysiinta Ganaaxa si buuxda. Haddii bixin buuxda aan la helin waqtigan gudahiis markaas maamulka degaanka waxaa laga doonayaa iyadoo la raacayo Xeerka inay bilaabaan u gudbinta Maxkamadda Degaanka ee fal dambiyeedka ah maqnaansho aan la ogolaan ee ilmahaaga.

Haddii lagu caddeeyo, tani waxay keenaysaa ganaax ah ilaa £1,000 iyo/ama arrimo kala duwan oo kala ah Amarro Waalidka la dul saaro ama Ganaax Bulsho ka dhex shaqayn. Haddii dambiga lagugu helo waalidka waxaa la gelinayaa diiwaanka dambiyada.

"DAMBIGA MA LA IGU QAADAYAA HADDII AAN BIXIYO GANAAXA LAAKIIN ILMAHAYGU WALI KA MAQAN YAHAY DUGSIGA"

Lagugu qaadi maayo waqtiga Ganaaxa ku xusan, lacag bixintaas ayaa tirtiraysa arrintaas. Hase yeeshee, arrintu waxay ahaan kartaa in dambiga laguu raacdo waqtiyo kale oo maqnaansho fasax la'aan ah taasoo aan ku xusnayn Ganaaxa, taasoo ku xiran xaaladda. Haddii tani jirto, waa muhiim inaad si toos ah ula shaqayso dugsiga ilmahaaga iyo hay'adaha caawinta sida Caawinta Waxbarashada.

"MA HELI KARAA CAAWIN HADDII ILMAHAYGU SI CAADI AH U TAGIN DUGSIGA?"

Haa, dugsiga ilmahaaga iyo Adeegga Caawinta Waxbarashada waxay ku siinayaan talo-bixin iyo caawin haddaad caawin uga baahan tahay xaadiridda ilmahaaga. Waa muhiim inaad kala hadasho dugsiga ama Adeegga Caawinta Waxbarashada sida ugu horraysaba haddii aad walwal ka qabto xaadiridda ilmahaaga.

“SABABTEE LA IIGU SOO DIRAY MACLUUMAAD-SIDAHAN?”

Macluumaad-sidahan waxaa loo diray waalid kasta / daryeele kasta si qof kasta ugu baraarugsanaado baahida in ilmahoodu xaadiro si joogta ah dugsiga si ay heer fiican u gaaraan.

Waa muhiim in waalidiinta iyo daryeelayaashu ay fahmaan waajibaadkooda iyo saamaynaha in ilmahoodu xaadiri waayo dugsiga fasax la’aan.

“MAXAAN SAMAYNAYAA HADDII ILMAHAYGU KA MAQNAANAYO DUGSIGA?”

Teleefoon u dir dugsiga sida ugu dhaqso badan subaxa ugu horeeya ee maqnaanshahooda adigoo sheegaya sababta.

Samayso ballamaha caadiga ah ee dhakhtarka ilkaha & dhakhtarka guud waqtiga dugsiga kaddib ama fasaxyada dugsiga. Haddii ay tahay inaad samaysato ballan waqtiga dugsiga, ku caawi ilmahaaga inuu maalinta inteeda badan joogo dugsiga adigoo ogaysiinaya ballanta.

Waxaa lagu waydiin karaa caddayn caafimaad ama warqadda ballanta haddii ilmahaagu inta badan u maqan yahay sabab la xariirta caafimaad-xumo ama ballamaha ilkaha/caafimaadka.

“WAA SIDEE HADDII AAN AADAYO FASAX?”

Fasaxyada waqtiyada dugisigu furan yahay caadiyan lama ogola. Xaalado gaar ah waydii oggolaansho Madaxa Dugsiga adigoo eegaya siyaasadda dugsiga.

“GOORMAA LA ISTICMAALI KARAA GANAAXA?”

Haddii dugsigaagu oggolaado in ilmahaagu ka maqnaado dugsiga ama aqbalo sharaxaaddaada, maqnaansho waa ‘la ogol yahay’. Dhammaan maqnaanshaha kale ‘lama ogola’.

Ogaysiin Ganaax waxaa loo isticmaali karaa maqnaanshaha aan la ogolayn, tusaale ahaan markii:

- waalid uu ilmahooda u kexeeyo fasax waqtiga dugsigu furan yahay oggolaansho la’aan, gaar ahaan markii ay sidaas ilmuhu ku luminayaan imtixaanno, tusaale SATs iyo GCSEs.
- cabashooyin ka yimaada dugsiga oo muujinaya maqnaasho badan oo waqtigaas ah oo aan la oggolaan.
- ardaydu si caadi ah u soo daahaayaan mar kasta kaddib markii xaadirintu dhammaato.
- arday haddii uu haysto 8 ama ka badan oo maqnaansho aan la oggolaan ah ee 10-kii usbuuc ee la soo dhaafay.

“MAXAAN SAMAYNAYAA HADDII ILMAHAYGU GOOGOOYS YAHAY?”

Haddii ilmahaagu googooys yahay waxaad:

- kala hadlaysaa sababta.
- la kulmaysaa xubin ka tirsan shaqaalaha dugsiga si aad ugala hadasho xaaladda una hesho xal.
- la xariiraysaa Adeegga Caawinta Waxbarasho ee talo-bixin iyo hagid (la xariir lambarada gadaasha ku qoran).
- isku day inaad fahamto waxa ku dhacaya ilmahaaga adigoo ka caawinaya xallinta dhibaatada.

Waxbarashadu waa furaha guushooda markaa waa inaad ku xaliso sida ugu dhaqso badan.

“SABABTEE U XAADIRAYAA MAALIN WALBA?”

Xaadiritaan fiican ee dugsiga waxay ilmahaaga siinaysaa fursadda guusha kana caawinaysaa horumarinta xirfadaha nolosha. Ilmahaagu waa inuu xaadiraa dugsiga maalin walba haddii aysan jirin arrin u diidaysa sida xanuun.

Ka maqnaanshaha dugsiga waxay dhaawacaysaa waxbarshada ardayga iyo buundooyinkooda (cilmi-baaris ayaa muujinaysa 17 maalmood oo maqnaansho ah inay inta badan keento buundo hoos u dhac ee GCSE), kala gooysaa la qabsiga iyadoo ku keeni karta ilmaha inuu sameeyo dambi.

Ardaygu inuu dugsi uga maqnaado ma ahan sababaha sida dukaamaysi, maalmo dhalasho ama sugitaanka qof dayactire ah.

Ka maqnaanshaha dugsiga waxay si xun u saamaynaysaa fursadaha nolosha.

“SABABTEE LOO BIXIYAA OGAYSIINTA GANAAX?”

Waalidiinta/daryeelayaasha waxay galayaan fal dambi haddii ilmaha aysan si caadi ah u xaadirin dugsiga oo uusan dugsigu oggolaan maqnaanshaha (maqnaansho aan la oggolaan). Xaaladaha qaar maqnaansho aan la oggolaan waxay keeni karaan maxkamadayn la raacayo Qaybta 444 ee Xeerka Waxbarashada 1996.

Xeerka Dhaqan-Xumida Bulsho 2003 wuxuu soo saaray Ogaysiin Ganaax badal ahaan u ah maxkamadayn. Ogaysiin Ganaax uma baahna maxkamad imaansho, laakiin wali ujeeddadu waa hagaajinta xaadir ahaanshaha.

“WAA IMMISA LACAGTA GANAAXA?”

£50 haddii lacagta lagu bixiyo 28 maalmood gudahood. £100 haddii lacagta la bixiyo maalintaas kaddib laakiin isla 42 maalmood gudahood.